

# Sannadkii hore Ma bixisay Kiro? Mus Thov Koj Qhov Credit! Dalbo Dib usoo Celin!



## Maxaan u baahanahay si aan u dalbado Dib ucelinta?

Waxaad u baahan tahay cadeyn Shahaadada Kirada La Bixiyay (CRP)

- Mulkiilahaaga ama wakiilkaaga maamulaha waa inuu ku siiyo CRP ugu dambeyn 31 Janaayo, 2026
- Waxaad heli doontaa hal CRP qeyb kasta oo aad sannadkaas ka kiraysatay

## Sideen u dalban karaa Dib usoo celinta?

Waxaad dib ucelinta ku dalbanaysaa adiga oo buuxinaya Foomka M1, Canshuur Celinta Dakhliga Shakhsiyeed. Waa inaad ku dartaa nuqulka CRP-yadaada, haddii kale dib-u-dhac ama diidmo ayaa laga yaabaa inay timaado.

- **Elektaroonik ahaan:** U isticmaal software-ka canshuurta si aad khadka tooska ah uga soo dirto canshuur celinta dakhligaaga Minnesota.
- **Boostada:** Booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) si aad u soo degsato ooad u buuxiso Foomka M1, Jadwalka M1REF, iyo Jadwal-ka M1RENT. Noogu soo dir canshuur celintaada oo dhammeystiran oo ku dar nuqul kasta oo CRP-yadaadii sannadkii hore.

## Goormaan Dalban Karaa?

Waa inaad dalbataa ugu dambeyn 15Aabril, 2026, si aad uga fogaato ganaaxyada. Haddii aan lagaa doonayn inaad canshuurta dakhli soo gudbis, waxaad haysataa 3 ½ sano laga bilaabo taariikhdaas si aad u dalbato lacag dib usoo celinta kiraystaha.

## Walbahaarka caamka ah ee Dib usoo celinta Kiraystaha

### Ma aanan helin CRP ama waxaan u baahanahay in keyga la saxo.

La xiriir mulkiilahaaga ama wakiilkaaga maamulaha oo ka codso inuu saxo ama ku siiyo CRP-gaaga. Haddii aysan sidaas yeelin, naga soo wac 651-296-3781 ama 1-800-652-9094.

### Dakhligaygu wuu ka yaraaday kirada guriga ee la bixiyay.

Waxaad weli dalban kartaa dic usoo celinta. Markaad soo gudbisno canshuur celinta dakhli ee Minnesota, waa inaad ku dartaa sharaxaad sida aad u heshay lacagaha aad ku bixisay kiradaada. Tani waxay sidoo kale khuseysaa haddii khadadka 1 ee Jadwalka M1RENT uusan la mid ahayn dakhligaaga guud ee la hagaajiyay ee federaalka ee khadka 1 ee Foomka M1.

### Waxaan qabaa su'aalo kale.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dib usoo celinta Kiraystaha ama habka cusub ee CRP, booqo boggayaga internetka [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo gal.